



SOO-KOOBID GUUD

SI KOOBAN:

Barnaamijka SAFE Housing Saint Paul waa hab ah waxqabad cusub oo Lagu Difaacayo Kireysteyaasha Guryaha laga bilaabo 1-da Maajo, 2021. Halkan waxaa kuugu qoran wawa uu ku saabsan yahay waxqabad kasta.

WAXA KHASAB KU AH KIREYSTEYAASHU IN AY OGAADAAN

RAADINTA GURI KIRO AH



Guri miyaad raadsaneysaa?
Akhriso Habraacyada
Soo-baarashada Kireystaha



Guri ma heshay?
Akhriso Heerarka
Lacagta Curaarta

HAYSASHADA GURIGA



Ma waxaad heshay ogeysiis ah in aad guriga ka baxdo?
Akhriso sharciga Ogeysiiska
Caddaaladeysan

IS-BEDDELKA MILKIILAHAA



Dhismaha miyaa la iibinaya?
Akhriso Sharciga ah
Ogeysiiska la Iska Rabo.

HABRAACYADA SOO-BAARASHADA KIREYSTAHA

Habraacyada Soo-baarashada Kireystaha waa habraacyo sharci ahaan isku mid ah oo lagu soo ogaado dambiyada iyo taariikhaha kireysiga guryihii hore ee qof codsanaya guri uu kireysto.

HEERARKA LACAGTA CURAARTA

Sharciga Heerarka Lacagta Curaarta waa lacagta horumariska ah ee Curaarta Guriga iyo Kirada Bisha.

SHARCIGA OGEYSIISKA CADDAAALADEYSAN

Sharciga Ogeysiiska Caddaaladeysan waxa uu dhigayaa inay milkiileyaashu siiyan dadka guriga ka kireysta qoraal ah Ogeysiis Caddaaladeysan oo ah marka aan loo cusbooneysiin doonin heshiiska kirada.

SHARCIGA OGEYSIISKA LA ISKA RABO

Sharciga Ogeysiiska La Iska Rabo waxa uu xaqiijinaya in ay milkiileyaashu u gudbiyaan ogeysiis ah wada-hadalka iibinta guriga Magaalada Saint Paul iyo kireysteyaasha guriga ku nool ka hor intaan *Guryaha Kirada Jaban loo bandhigin suuqa, oo ay dabadeedna milkiileyaal cusub soo gudbiyaan ogeysiis ah iibinta marka lala kala wareegayo milkiyaddii lahaanshaha, oo ay la socoto muddadii Difaacidda Kireystaha

WAXA KHASAB KU AH MILKIILEYAASHU IN AY OGAADAAN

SOO-DHEJINTA GURI KIRO AH



Guri kiro ah miyaad haysaa?
Akhriso Habraacyada
Soo-baarashada Kireystaha



Guri kiro ah miyaad heshay?
Akhriso Heerarka Lacagta
Curaarta

XILLIGA KIRADU SOCOTO



Ogeysiiska guuridda miyaad bixineysaa?
Akhriso sharciga Ogeysiiska
Caddaaladeysan

IS-BEDDELKA MILKIILAHAA



Guriga miyaad iibineysaa mise iibsaneyesa?
Akhriso Sharciga ah
Ogeysiiska la Iska Rabo

HABRAACYADA SOO-BAARASHADA KIREYSTAHA

Habraacyada Soo-baarashada Kireystaha waa xaqijin ah helidda guryaha oo sharci ahaan isku mid ah oo lagu soo ogado dambiyada iyo taariikhaha kirada guryihii hore ee qofka codsanaya guri in uu kireysto.

SHARCIYADA LA XUSUUSANAYO:

- Ka hor inta aysan milkiilayaashu yeelin codsi ama qaadan lacagta codsiga ee guriga kirada ah, waxaa khasab ah in ay codsadaha siyyaan Shuruudaha Soo-baarashada.
- Shuruudaha Soo-baarashada waxaa khasab ah in ay ka tarjumayaan Habraacyada Soo-baarashada Isku-midka ah ee lagu aqoonsado macluumaadka la isticmaali karo iyo kuwa aan la isticmaali karin ee la xiriira soo-baarashada iyo muddada

Ma dhaceysyo sharcigan...

- In uu milkiileyaasha ka horjoogsado soo-baarashada kireysteyaasha guriga raba.
- In uu milkiileyaasha ka hor-istaago ama ka joojiyo inay adeegsadaan habraacyo ah soo-baarasho aan adkeyn.



KIREYSTEYAASHA WAXA LAGA SOO BAARAN KARO:

- Raadraaca kirooyinkii hore
- Guri-ka-sarid 3-dii sano ee ugu dambeysay (deyn ay ku leeyihiin milkiile guri oo hore ama shirkadda korontada)
- Macluumaadka amah jirta: deynta milkiile hore ama shirkad koronto.
- Jebina Sharciga Xakameynata Maandooriyaha Federaalka (21 U.S.C. 802)
- Shuruudaha dambiliha loo diiwaangeliyo tacaddiyo fal galmo ah oo aan ka harayn
- Xukunka dambiyar yaryar 3-dii sano ee ugu dambeeyey
- Xukunka dambiyar waaweyn 7-dii sano ee ugu dambeysay
- Calaamadi xukun ah dambiyada culus 10-kii sano ee la soo dhaafay



KIREYSTEYAASHA WAXAAN LAGA SOO BAARAN KARIN:

- Taariikh kiro oo aan jirin
- Guri-ka-sarid ah 3 sano ka hor
- Heerka buundada sumcadda qofka
- Sumcad shakhsii ah oo aan jirin
- Dambiyar Yaryar
- Dambiyada wadashada baabuurta
- Xirid ama eedeyn aan la isku xukumin
- Ka-qeybgalka ama Dhameystirka barnaamij ah dhaqan-toosin ama in la isu gudbiyo
- Xukun laga noqday ama la iska cafiyey
- Dembiyo aan MN hadda ka ahayn sharci-darro
- Xukunka dambiyada ku jira Habka Maxkamadda Dhallinta

Isticmaalidda baarasho ah Taariikhda Dembiyo hore oo ku saleysan taariikhda xukunka dambiga.

HEERARKA LACAGTA CURAARTA

Sharciga Heerarka Lacagta Curaarta waxaa lagu xaqijinayaa helitaanka sinnaanta gaar ahaaneed ee guryaha iyadoo la xadeynayo kharashka horumariska ah ee la xiriira Curaarta iyo Kirada bisha.

SHARCIYADA LA XUSUUSANAYO:

- **Xadeynata heerka Lacagta Curaarta ah:** Milkiileyaashu kama qaadi karaan oo kuma dallici karaan kireystaha Lacag Curaar ah oo ka badan Kirada Hal Bil. Eeg wixii ka reebban.

- **Xadeynata Kirada Horumariska ah :** Mulkiilayaashu kama qaadan karaan oo kuma dallici karaan kireystaha Kiro Horumaris ah oo ka badan Kirada Hal Bil. Eeg wixii ka reebban.

- **Waxa ka reebban:** Haddii uu qofka guriga soo codsaday ka soo bixi waayo shuruudaha soo-baarashada marka loo eego Habraacyada Soo-baarashada Kireystaha, markas ayuu milkiiluhu ka codsan karaa Lacag Curaar dheeraad ah ama lacag ah Kirada Horumariska in looga dhigayo shuruudda oggolaanshaha. Qeybtan kama hor istaageyso milkiiluhu in uu ka sii qaato curaar ah xayawaanka rabbaayadda ama Lacagta Codsga Kirada.

SHARCIGA OGEYSIIS CADDAALADEYSAN

Sharciga Ogeysiiska Caddaaladeysan waxaa lagu hagaajiya xasilloonida guryaha iyadoo la hubinayo in ay milkiilayaashu sameeyaan mid (1) ka mid ah tobani (10) **Sababood oo Caddaalad ah** iyo in kireysteyaasha lagu siyo si qoraal ah **Ogeysiiska Sabab Caddaaladeed** marka aan loo cusbooneysiineyn heshiiska.

Marka aysan milkiilayaashu rabin inay cusbooneysiyaan heshiiska kirada, waa inay:

1. Ogeysiiska Sababta Caddaaladeysan Siyaan kireystaha (kireysteyaasha) iyagoo waraaq ugu qoraya macluumaadka soo socda:

- a. Sababta loo joojinayo heshiiska (Sabab Caddaaladeysan), iyo
- b. Xaqiiqooyinka taageeraya sababta (sababaha)

Mulkiilayaashu ma joojin karaan heshiiska kirada ilaa ay sameyn karaan mid ka mid ah tobanka qodob ee la isu oggol yahay ee ah Sababaha Caddaaladeysan.

Gebi ahaan heshiisyada kirada guryaha waa inay ku qoran yihiin Ogeysiiska Sababaha Caddaaladeysan ee soo socda:

"Milkiilaha guriga la kireystay keli ahaan uma jebin karo heshiiska ama iskuma dayi karo in uu jebiyo kireysiga kireyste kasta haddii uusan milkiiluhu maxkamadda u caddeyn karin sabab caddaaladeysan oo jirta. Sababaha jebinta kirada ee u qoran Magaalada Saint Paul oo ah Ogeysiiska Sababo Caddaaladeysan (Sec. 193.05), oo ma jiraan wax kale, oo noqon kara sabab caddaaladeysan marka la eego shurduudaha sharcigan"

1. Lacagta kiradii oo la bixin waayey
2. Lacagta kirada oo marar badan lala soo daahay
3. Inaan loo hoggaansamin wixii lagu heshiiyey
4. Diidmo ah cusbooneysiin cusub.
5. Milkiilaha ama xubin qoyska ka tirsan oo degaya guriga
6. Dhismaha oo la duminayo si guri cusub loogu beddelayo
7. Dibu-dhisid iyo dayactirid
8. Fulinta amar dowladeed oo sheegaya in guriga laga baxo
9. Degista oo shuruud ahaan ku xiran shaqo.
10. Dad xad-dhaaf ah oo guriga ku nool

SHARCIGA OGEYSIISKA LA ISKA RABO

Sharciga Ogeysiiska La Iska Rabo waxa uu taageeraa ilaalinta guriga ay deggen yihiin dadka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dhedhexaadka ah si ay u helaan xasillooni iyo daahfurnaan ay kireysteyaasha ugu baahan yihiin wixii is beddel ah oo saameynaya guryahooda. Waxa lagu hubiyaa in ay milkiileyaasha hadda bixiyaan **ogeysiiska ah iibin loo bandhigay** Magaalada iyo kireystaha ka hor intaan suuqa la gelin guriga aan lagu kireysan karin qiima jaban oo ay milkiileyaasha cusub bixiyaan **ogeysiiska iibinta wareejinta lahaanshaha** ka dib markay dhacdo, iyadoo ay la socoto **Muddada Difaacidda Kireystaha**. Sharcigan wuxuu khuseeyaa dhammaan "**Guryaha Qiimaha Jaban**" sida hoos ku qeexan.

# BEDROOMS	AT OR BELOW 80% AMI
Efficiency	\$1,448
1 Bedroom	\$1,552
2 Bedrooms	\$1,860
3 Bedrooms	\$2,150
4 Bedroom	\$2,400

ILAA 2020

Guryaha Qiimaha Jaban:

Guri kasta oo kiro ah oo boqolkiiba labaatan (20) ama ka badan lagu kireysto lacag gaareysa ama ka hooseysa 80% Isku-celiceliska Dakhliga Deegaanka (AMI) xadka kirada la awoodi karo. Sannad kasta hay'adda guryaha dowladda ee HUD ayaa wax ka beddesha.

Ka hor inta aan *La libin Guryaha Qiimaha Jaban

Milkiilaha waa in uu bixiyo **Ogeysiis ah libinta in la Soo Jeediyo** Taas macnaheedu waa in lagu wargeliyo maamulka Magaalada Saint Paul iyo dadka ku nool Guryaha Qiimaha Jaban Lagu Dego si ay ula socodaan qasdiga ah in guriga la gelinayo suuqa 90 maalmood ka hor intaan la Shaacin libinta guriga.

Marka *Guriga Qiimaha Jaban la iibyo

Milkiilaha cusub waa in uu bixiyo **Ogaysiiska libinta**. Taas macnaheedu waa in lagu wargeliyo Magaalada Saint Paul iyo dadka ku nool Guryaha Qiimaha Jaban Lagu Dego in milkiilaha la beddelay ilaa iyo 30 cisho gudhood iibsashada ka dib.

90-ka maalmood Muddada Difaacidda Kireystaha

Milkiilaha cusub waa in uu sidoo kale ogeysiyo Magaalada iyo dadka ku nool Guryaha Qiimaha Jaban Lagu Degi Karo iyo qorshaha la dhigtagtay intii ay socotay iyo ka dib Muddada Difaacidda Kireystaha, sida kororka kirada guriga, dibu-baaris iyo ogeysiis guriga looga baxayo sabab la'aan. Ficillada qaarkood waxa ay sababi karaan qofka kireyste ah in lagu caawiyo Ku-noolaanshaha Meel Kale.